

Maxaa ilmaygu ugu baahanyahay in la Talaalo?

Talaalku waxaa uu jirka qofka ka difaacaa cudurrada Talaal la'aan ama Talaalka oo wakhtigiisa dhaafa waxuu ilmaha u keeni karaa cuduro sida jadeecada, Cagaarshowga (Jooniska), cudurka dareenka maskaxda galla ee meninjaytiska loo yaqaan, iyo busbuska oo laga qaado dadka kale. Istalaalidu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah barnaamijka daryeelka cafimaadeed ee ilmahaaga.

Xagee ka doontaa talaalka ilmahaygu u baahanyahay?

Talaalka cunugaagu u baahanyahay waxaa talaali kara dhakhtarkiisa ama Xirfadlaha cafimaadeed ee jooga rugta cafimaadka. Waxaad ku dadaashaa marwalba oo aad cunugaaga u geysid dhakhtarkiisa in aad ka waraysato dhakhtarka talaalada uu u vanilla cunugaaga. Waxaad kaloo talaal raqiis ah ka heli karta qeybaha qaabilsan caafimaadka guud ee dadweynaha, maadama ay qeybahaasu laftirkoodu ku (Project L.O.V.E.) jiraan mashruucan la magac baxay Jacaylka iyo Daryeelka ciyaalka. Waxaad waci kartaa Franklin County Gudigga Cafimaadka oo lambarkoodu yahay (614 462-3635) ama Columbus Caafimaadka Guud ee Dadweynaha (614-645-7945).

Cudurradda Talaalku kaa badbaadin karo waa kuwee?

Hepatiitis B oo somaalidu u taqaan cagaarshow (noocaB) ama Joonis (nooca B) Cagaarshowgu waxuu caabuuq (infakshan) ku keenaa beerka waxuuna qofka U keeni karaa kansarka beerka ku dhaca, amaba in qofku u dhintu cudurka cagaarshowga.

Diphtheria oo loo yaqaan Gawracatada waxuu caabuuq (infekshan) ku ridaa sanko iyo dhuunta, taasoo keeni karta in wadnuhu howlgab noqdo iyo xitaa dhimisho.

Tetanus (lackjaw) oo loo yaqaan teetane (Daan iskukog) waxaa uu qofka ku ridaa murqaha oo is dhufaa ama gariira, neefsashada oo ku adkaata , wadnaha oo dhib ku yimaado, iyo xitaa dhimisho.

Pertussis (whooping cough) oo loo yaqaan xiiqdheer. Xiiqdheertu waxay qofka ku ridaa qufac aad u darran. Qufacaasoo saamayn ku yeelan kara neefsashada iyo inuu qofka ku dhaco jeermis sambabada gala iyo suuxdin iyo xataa dhimisho.

Polio oo loo yaqaan Dabaysha. Cudurka Dabaysha waxuu tamarta ka dilaa murqaha, waxuuna qofka ku ridaa qalal ama in xubnaha ka dhaqaaqi waayo iyo xitaa dhimisho.

Haemophilus Influenza Type B (Hib) oo loo yaqaan HARGABKA (nooca B) waxuu qofku ku ridaa cudurka (dareenka maskaxda iyo lafdhabarta) galla ee meninjaytiska loo-yaqaan iyo infekshano kale oo darran.

Measles oo loo yaqaan Jadeecada waxay keentaa qandho sareysa, finan yaryar oo jirka ka soo baxa, waxayna keeni kartaa dhibaatooyin kale oo aad darran.

Mumps oo loo yaqaan qaamo-qashiirka, qaamoqashiirka waxuu keenaa barar qanjaha iyo qalka (gowsaha hoostooda) ah oo xanuun badan.

Rubella oo loo yaqaan (Jadeecada Jarmalka) waxay dhibaato ama waxyeelayn kartaa ilmaha aan welli dhalan ee uurka ku jira hadii hooyada ay ku dhacdo Jadeeca Jarmalka bilaha ugu horeeya ee uurka.

Varicella Zoster (chickenpox) oo loo yaqaan Busbuska ama Hablobaas. Busbuska ama Hablobaaska waa cudur qofka u keena finan oogada ka soo baxa oo xitaa keeni kara caabuuq (infekshan) gala duubka (maqaarka) qofka waxuu kale oo keenaa jermis sambabada ku dhaca, iyo maskaxda oo waxyeelowda amaba dhimisho.

Hepatiitis A oo loo yaqaan cagaarshowga (nooca B) ama Joonis (nooca B) wa cudur halis ah oo ku dhaca beerka. Waxuu cudurkani keeni karaa calool xanuun daran, shuban iyo marmarka qaarkood oo uu keeno dhimisho.

Rotavirus waa cudur keena shuban daran, oo badanaa la socdo matak iyo xumad oo ku yimaada ilmaha dhaladka ah ama da'da yar.

Pneumococcal waa cudur keena jeermis ama caabuuq (infekshan), infekshankaas oo keeni kara cudurka galla dareenka maskaxda ee loo yaqaan meninjaytis, iyo dhiig sumowga ama caabuuq (infekshan) dhiiga gala, infekshan dhagaha gala, cudurka namooniyaha ee jeermiska sambabada gala, dhagobeel, iyo maskaxda oo waxyeelowda iyo waliba dhimisho.

Meningococcal disease waa cudur keeni kara dabac ku yimaada gacmaha iyo lugaha, dhagobeel, iyo dhibaatooyin ku yimaada habdhiska dareen-wadka dhexe, suuxdin ama maskaxda oo dhiig ku furmo, maskaxda oo hoosu dhac ku yimaado, ama xitaa dhimisho.

Human Papillomavirus waa cudurka Papillomavirus la yiraahdo noociisa dadka (bani aadanka) ku dhaca. Cudurkani waa cudurka ugu badan ee la isugu gudbiyo galmada (ama isutagga ragga iyo dumarka) ee wadankan Maraykanka. Waxuu kaloo keeni karaa kaansar ku dhaca ilma galeenka. Kansarka ku dhaca ilma galeenka waa cudurka labaad ee ugu badan dhimishada loo dhinta kansarka oo ay dumarka u dhintaan caalamkoo dhan.

Mashruuca ku saabsan Jacaylka (LOVE)

Mashruuca Jacayl. (Jacaylkan Ilmaheena, Talaal waqithore!) Wada shaqeyn gaar ahaaneed ayaa ka dhaxeysa Dagmada Franklin Isbitaaladeeda, Dhaqaatiirta nowaaxiga Magaalada Columbus iyo Hey'ada Cafimaad ee dagmada Franklin iyo Ganacsatada magaalada iyo Ururada Jaaliyada, oo muraadkoodu (qasdigooda) yahay, in ay hubiyaan Caruurta dagmada franklin ee sandkoodu yahay laba sono in ay dhameystaan talaalkooda oo dhan.

Talaalku... Waa Darbiga Ka difaaca Cudurada Carurta



Talaalku waa muhim waana in markasta carurta la baaro, si joogto ahna loo geeyo Dhaqtarka, waana darbiga ka difaaca cudurada caruurta taas oo ah horseeda caafimaad qabka ilmaha cudurada ilmaha ku dhaca sida jadeecada, (measles), cagaarshowga (hepatitis) iyo infaction ku dhaca xuubka maskaxda iyo lafdhabarta oo la dhaho (meningitis), xiihdheer (whooping cough), Cuduradaas dilaaga ah oo dhan waxaa caruurta looga difaaci karaa ayadoo caruurta loo dhamaystiro talaalkooda inta aysan labo jirsan.

Waxaa Mashruucan Ka qaybqaatay maalgalintiisa...



240 Parsons Ave
Columbus, OH 43215
614.645.LOVE
www.projectlove.org

talaalku...



Rukniga
asaasiga u ah
Caafimaad
wanaagga
ilmaha
Laba
Jirka
Ah



614.645.LOVE
www.projectlove.org

Maxaa dhici kara hadaan ilmahayga la talaalin?

Cudurrada talaalku ka hortago ayaa cunugaaga ku dhici kara oo uu keeni kara jira daran ama u keeni kara dhibaatooyin kasii daran sida dhagabeel, maskaxda oo waxyeelowda, ama xitaa dhimisho. Talaalka oo ilmaha la talaalo wakhtiga ku haboon waxuu ilmaha ka hor istaagaa jirooyin badan.

Kawaran hadii ilmahaygu jiranyahay marka la gaaro wakhtigii la talaali lahaa?

Marwalba oo aad ilmahaaga u geyso dhakhtarka waxaa wediisa meesha uu talaalka ilmaha u marayo, xitaa hadii ilmahaagu uu qaadanayo antibiyootiga ama uu hayo xanuun yar sida qandho hooseeysa, ama hargab (duray) ama shuban. Wax dhiba malaha hadii xitaa la talaalo marka xanuunadaas yar yar ay ilmaha hayaan.

Goorma ayuu ilmahaygu u baahanyahay in la talaalo?

Ilmahaagu waxuu u baahanyahay talaalo xiriir ah inta aysan da'diisu gaarin laba jir. Dhakhaatirta intooda badan waxay ku taliyaan jadwalka ku sawiran warqadan ee qeexaya Marka ilmahaagu u baahanyahay talaalka iyo noocuu u baahanyahay taasoo ku xiran kolba inta bilood ee da'diisu gaarsiisantahay. Jadwalkani waa uu isbadali karaa, sidaa daraadeed waa muhiim inaad marwalba dib u hubiso talaalada uu ilmahaagu u baahanyahay marwalba ood ilmaha dhakhtarka u geeso.

Kawaran hadii ilmahaygu dib u dhac xaga talaalka ah ay ku timaado?

Majirto wakhti aan laga daba tagi Karin talaalka hadii wakhtigiisa dhafo. Marwalba ilmaha talaalkiisa oo dhan waa loo dhamaystiri karaa. Sida ugu wanaagsan oo aad u hirgalin kartid in ilmahaago talaalkiisa wakhtiga ku haboon la talaalo, waa inaad dhakhtarka balamahiisa joogtaysaa ama u geysaa xirfadlaha cafimaadeed ee rugta daaweynta iyo caafimaadka jooga.

Jadwalka Talaalka Ilmaha

	Markuu ilmahu Dhasho	2 bilood	4 bilood	6 bilood	12-15 bilood	4-6 sano	11-18 sano
Hep-B Cagaarshowga ama joonisk nooca B	✓	✓		✓			
DTaP Gawracatada, teetanaha, iyo xiiqdeerta (Kixda)		✓	✓	✓	✓	✓	✓
Hib Hargabka nooca B		✓	✓	✓	✓		
IPV - Polio Dabaysha		✓	✓	✓		✓	
PCV7 Pneumococcal conjugate		✓	✓	✓	✓		
MMR Jadeecada, qaamoqashiirka, jadeecada jarmalka					✓	✓	
Chickenpox Busbuska (Hablobaas)					✓	✓	
Rota Rotavirus		✓	✓	✓			
Hep-A Cagaarshowga ama joonisk nooca A					✓		
MCV4 Meningococcal							✓
HPV Human Papillomavirus							✓
Flu Hargabka (Durayga)					Sanadkasta laga bilaabo marka uu ilmuhu jiro lix bilood		

Waa maxay khatarta ka imaan karta talaalka?

Dadka intiisa badan wax dhib ah iskuma arkaan marka la talaal. Ilmahaaga waxaa laga yaabaa inuu dareemo xanuun, goobta laga talaalay oo gaduudata ama casaan noqota ama bararta. Waxaa laga yaaba in ilmahaaga aad ku aragtid wareer ama lumo. Dhakhtarka waxaa uu kugula talin karaa in aad siisid ilmahaaga daawada qandhada jabisa, sida dawada loo yaqaan "baby acetaminophen" oo loogu talagalay ilmaha laba jirka ka yar si ay dawadu ugu sahsho (oga qaybqaadato) daganaanta ilmaha. Khatarta talaal la'aanta ilmahaaga ayaa ka weyn khatarah aadka dhifta u ah ee hadii jirku lafaciltamo talaalka ama xanuunka ka iman karta talaalka.

Ilmahaaga wakhtiga ku haboon talaal, waxaanad hubisaa in talaalkasta uu meeshii loogu talagalay taaganyahay, meel fiican ku xifdisaa diwaanka talaalkiisa lagu qoro. Ha iloobin, talaalka iyo dhakhtarka oo balamahiisa la joogteeyo waa waxyaabaha ugu muhiimsan ee ka qayb qaadan kara cafimaad wanaaga ilmahaaga.

Fadlan isticmaal jadwalkan si aad ula socotid talaalada kala duwan ee ilmahaaga la talaalayo.

Hadii dib u dhac ku yimaado wakhtiga talaalka ku haboon waxaa jira jadwal loogu talagalay in dib ula qabsashada wakhtiyeed ee talaalka. Wixii macluumaad ah waxaad kala xiriirtaa dhakhtarkaaga ama boga internetka ee www.cdc.gov/vaccines si aad u hesho macluumaad intaa dhaafsiisan.

✓ Calaamadan Saxda ah waxay u taagan tahay wakhtiyada ku haboon in talaalada qaarkood ilmaha la siiyo.

✓ Cagaarshowga ama joonisk nooca A talaalkiisu waa labo goor 1 lix bilood u dhaxeeyso, midka hore 12 bilood ilmaha markuu jiro ayaa lagu talaalaa, midka labaad 1 lix bilood kadib oo ah markuu jiro sanad iyo lix bilood.

✓ Talaalka HPV waxaa loogu talagalay GABDHAHA OO KALIYA. Talaalka HPV waa sadax jeer. Talaalka ugu horeeya waxaa la talaala gabadhu markay dhalato, talaalka labaad waxaa la talaala markay laba bilood soo gaarto, iyo talaalka ugu dambeeya oo lix bilood loo dhaxeysiiyo.